



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 22, 2021-ka

Ku socota: Shaqada ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha DSA

Ka socoto: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Is xasuusinta soo sheegista shuruudaha looga baahan COVID-19

Tani waa is xasuusinta soo sheegista shuruudaha looga baahan COVID ee loogu talagalay shaqada iyo bixiyayaasha taageerada hawlaha maalintii (DSA).

Waa muhiim in Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) uu hayo macluumaad ku saabsan kiisaska la xaqiijiyay in ila qabo cudurka si la iskugu wargeliyo siyaasada oo loola xiriiro hawl-wadaagayaasha oo ay ku jiraan maamulka caafimaadka ee degaanka si looga caawiyo taageerada. Waxaan sidoo kale u baahanahay macluumaadkan si loo xaqiijiyo caafimaadka iyo badbaadada dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka.

Waxaa looga baahan yahay shaqada iyo bixiyayaasha DSA in ay raacaan nidaamyada ogeysiinta ee lagu tilmaamay [Habka Waxyaabaha Dhici kara ee ODDS](#). [Farriinta wax gudbinaysa ee AR 20-099](#) ayaa faraysa isticmaalka foomka soo sheegida ee [ODDS COVID-19, kaasi oo ku xiran Habka Waxyaabaha Dhici kara ee ODDS](#). Tallaabooyinka ay tahay in hay'adu qaado marka qof ka tirsan adeegyo, shaqaalaha taageerada tooska ah, ama xirfadlayaasha shaqadu yeeshaan ama ay dhici karto in ay yeeshaan COVID-19 lagu ogaado dokumentiga dhacdooyinka suurtagalka. Ogeysiinta muddo 24 saacadood gudahood ah ugu soo dir ODDS: [ODDS.FieldLiaison@dhsosha.state.or.us](mailto:ODDS.FieldLiaison@dhsosha.state.or.us). Foomka soo sheegida waxaa laga helayaa internet-ka: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/ODDS%20Resource%20Library/ODDS-COVID-Reporting-Form.docx>.

Raacida siyaasadani iyo soo sheegista degdega ah ee kiiska COVID-19 oo loo soo sheegayo ODDS iyo hay'adaha maamulka kiiska iyo ku xirnaanshaha mas'uuliyiinta caafimaadka dadweynaha ayaa muhiim u ah dadaaladeena ka jawaabida cudurada baahsan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Keith Ozols  
Agaasimaha  
Tababarka Dhaqan celinta

*Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).